



Fasalka Afka Caalamiga ee Magaalada Uithoorn

Miyaad timid Wadanka Nederland adiga oo wata ilmo ama caruur?

Wali miyey ilmahaagu ugu hadlaan Afka Nederland ka si aan ku filayn ama xadidan?

Waxaa muhiim u ah caruurtaada in ay Afka Nederland ugu hadlaan, akhriyaan, qoraan si aan hakad iyo laaxin mid na lahayn. Haddaba waxaa kaalin muhiim ah ka ciyaaraya barashada ilmahaaga Afka Nederland Iskuulka Caalamiga ee ku yaala Magaalada Uithoorn.

Haday da'da ilmahaagu u dhaxayso 6-12 sano, wuxuu fursad u leeyahay ilmahaagu in uu kamid noqdo ardayda wax ka barata fasalkan Caalamiga ee lagu barto Afka Nederland. Fasalkan Caalamiga ee Magaalada Uithoorn waa mid loogu tallo galay dhamaan ardayda wax ka barata Iskuulka hoose ee khameetiga Magaalada Uithoorn. Iskuulkan Afka lagu baranayo wuxuu ku yaalaa Iskuulka hoose ee ciwaankiisu yahay ***De Springschans, Eendracht 8 in Uithoorn.***

Iskuulkan wuxuu ilmahaagu ku baranayaa aasaaska Afka Nederland. Waxaa ilmahaaga Iskuulkan la dhigan doona arday ka kala timid daafaha Dunida.

Ilmahaagu wuxuu fasalkan dhigan doonaa, ugu yaraan sanad, isaga oo ay weheliyaan arday kale oo ka kala timid daafaha Dunida waxaana la bari doonaa aasaaska Afka Nederland. Fasalkan oo lagu bixin doono aasaaska Afka Nederland waxa lagu bari doonaa ilmahaaga qoraalka, akhriska, xisaabta, yeedhiska iyo barashada cilmiga Biology, Juquraafi iyo Taariikhda.

Caruurtaadu waxay tagayaan iskuulka 5 maalmood totobaadkii, laga bilaabo Isniita ila iyo Jimacaha, saacadu markey tahay

8:30 ilaa 12.00 13.00 ilaa 15.00

8:30 ilaa 12.00 13.00 ilaa 15.00

8:30 ilaa 12.15

8:30 ilaa 12.00 13.00 ilaa 15.00

8:30 ilaa 12.00 13.00 ilaa 15.00

Ilmahaago ischoolka ayey ku qadeenayan, iyaga iyo ilmaha ischoolka kale ee `ITK`. Ilmaha oo idil waxay tahay inay soo qaataan cuntadooda iyo cabitaankode siday ugu cunaan fasax galinka hore iyo galinka dambe.

Walidiinta oo idil waxaa laga codsanayaa lacag dhan 0,50 cent maalintii (2,50 euro todabaadki ardywalba, lacagtaasi waxa lagu bixinaya mushaarka macalimiinta Caruurta lahaynayo xiliga labada fasax.

Ka qayb qaadashada Iskuulka magaciisu yahay **Internationale Taalklas Uithoorn** waa lacag la'aan ama bilaash. Waxaase lagu waydiin karaa lacag dhan 50 Euro sanadkiiba hal mar. Lacagtan waxaa loogu tallo galay in lagu sameeyo xaflado kala duwan sida ardayda oo meel lagu gayn doono oo kale.

Kadib marka uu ilmahaagu dhameeyo Iskuulka Internationale Taalklas, wuxuu fursad u helayaa in uu aado mid kamid ah Iskuulada hoose ee ku yaala magaalada Uithoorn ee deegaan ahaan kuu dhaw ama dookh ahaan ilmahaaga aad la jeceshahay in uu wax ka barto. Maalmaha ugu danbeeya ee uu aadayo ilmahaagu Iskuulka Internationale Taalklas wuxuu aadi doonaa maalin kamid ah maalmaha waxbarashada Iskuulada hoose ee Magaalada Uithoorn. Waxaa sidan loo samaynayaa in fahan laga siiyo ilmahaaga qaabka waxbrasho ee Iskuulada kale ee Magaalada Uithoorn.

Iskuulka Internationale Taalklas wuxuu ku dadaalayaa in uu si hagar la'aan ah u baro ilmahaaga habka waxbarasho ee Iskuulada Hoose isaga oo siinaya macluumaad aasaasi ah.

Sidoo kale ilmahaagu haddii uu na lahayn lambarka adeega bulshada ee loo yaqaano Burgerservive nummer (BSN), waxaad ogaataa in uu xaq u leeyahay in uu aado Iskuul.

Wixii macluumaad ah ee intaas dheer waxaad kala xidhiidhi kartaa Marwo M.Leslie-Miller. Tilifoonka: [0297-523397](tel:0297-523397) ama ciwaanka ah info.itk@wijzeraandeamstel.nl

www.itk-uithoorn.nl

Fiiro gaar ah: Warqadan waxaa lagu turjumay Afsoomaali. Hase ahaatee macluumaadka kale ee aad heli doonto waxay ku qornaan doonaan Afka Nederland ama English ka. Haddaba, haddii ay kugu adagtahay fahanka Afka Nederlandku waxaa markaas lagama maarmaan ah in aad raadsato qof kale sida qoyskaaga ama qof turjubaan ah ka oo kaacaawiya in aad si fiican u fahanto.